



▶ BEFORE THE INTERVIEW.....1
▶ DURING THE INTERVIEW.....3
▶ AFTER THE INTERVIEW.....5

# Interview *preparation*

Waraysi u diyaarinta codsadayaasha dhamaanad qaadka qaxootinimo

Waraysiga lala yeelanayo saraakiisha fiisa bixinta u xil saran ee Kanada ayaa ah talaabo muhim ah xaga go'aan ka gaarida codsiyada dhamaanad qaadka qaxootiga. Codsadayaasha ayaa waraysiga loogu wacaa warqad rasmi ah ama email amaba taleefoon. Ulajeedada waraysiga ayaa waxay tahay in la ogaado in uu qofka codsanayo dhamaan qaadka qaxootinimo uu yahay mid u qalmo loona ogolaani karo dib udajin kusalaysan barnaamijka dhaamaanad qaadka khaaska ee qaxootiga iyo in dib u dajinta Kanada ay tahay dooqa haboon ee xal u ah xaalada codsadaha.

Maadaamaa go'aanka sarkaalka fiisada muhim ahaan kuxiran yahay natiijada waraysiga lala yeesho codsadaha, maqaalkani ayaa waxaa uu bixin doonaa talooyiin kusaabsan sida la iskugu diyaariyo waraysi lala yeelanayo sarkaalka fiisada ee kanada iyo waxa la sameeyo xiliga waraysiga iyo kadibba.

## waraysiga hortiisa:

si taxadar leh dib u eeg dhamaan koobiga ama sawirka foomamka codsiga iyo dhamaan waraaqihii lagu lifaaqay ee kusaabsanaa xaaladaada ee loo gudbiyey sarkaalka fiisada (Safaarada). Hadii aadan koobiyada ama sawirada dokumentiyada haynin, fadlan ogaysii damaanad qaadayaashaada si deg deg ah si ay kaaga caawiyaan helitaanka koobiyadaasi. Marka aad dib u eegeysid foomamka codsiga iyo waraaqaha lagu lifaaqay ee taageeraya kiiskaaga, fadlan taxadar sii arimahan soo socda:

- Qoyska sida loogu xusay foomka miyuu wali ka kooban yahay? Hadii isbadalo ( guur, dhalasho ama dhimasha) aysan ku qornayn foomamka, fadlan u sheega sarkaalka fiisada ( iyo dhamaanad qaadayaashaada) arinkaas waraysiga hortiisa.

- Foomamka codsiga, DHAMAAN reerka waa in lagu xusaa iyada ood xusaysid xitaa kuwa aanan war laga haynin ama loo malaynayo in ay geeriyoodeen. Hadii aad ogaatid qaar kamid ah reerkaada ( kuwa codsiga kugula jira iyo kuwa aanan kugula jirinba) in aysan foomamka kujirin, fadlan qoraal kula socodsii sarkaalka fiisada iyo dhamaanad qaadayaashaada si deg deg ah
- Hubso in warbixinta kusugan codsiga ay tahay mid **sax ah** ee oogu **dambaysay.** Hadii aad khaladaad ku aragtid foomamka codsiga, fadlan ogaysii sarkaalka fiisada iyo dhamaanad qaadayaashaada waraysiga hortiisa.
- Waa in aad xaqiijisaa in aad gudbisay dhamaan warbixinada kuhaboon taakulaynta kiiskaaga.

Tusaalooyinka dokumentiyada caawiya codsiyada:

- Cadayn tusinaysa sheekada shaqsiyeed ee qaxootinimo (jaraa'idka warka, waraaqooyin ama oraahyo hanjabaad, oraahyo ay bixiyeen saaxibadaa iyo qoyskaaga, warbixin boolis iyo waxii lamid ah)
- Dokumenti tusinayo waxii qabsaday dad kale oo xaalada oo kale soo maray ( Tusaale ahaan, qaraabo loo aqoonsaday qaxootinimo);
- Dhamaan waraaqaha shaqsiyeed ee lahayo ee qofka cadaynayo
- Dokumentiyada la xiriira xaaladaada guur iyo reerka ( Shahaadooyinka guur iyo furiin, shahaadada dhalashada caruurtaada)
- Dhamaan dokumentiyada iyo waraaqaha ay kusiisay UNHCR.

Sheekadaada qaxootinimo waa in aad ogaataa.

Waxaad lasocotaa in sababaha ugu badan ee codsiyada lagu diido ay tahay warbixin isdaba marsan ama marqaati kac isdaba marsan. Tusaale ahaan, marka ay kala duwanaadaan warbixinada xilliga waraysiga iyo tii kusugnayd foomamka codsiyada. Sidaas darted, waa in aad si taxadar leh u **aqrisid sheekadaada shaqsiyeed** ee loo gudbiyeey sargaalka fiisada oo kaqayb ahayd codsigaaga. Marka aad dib u eegeeysid sheekadaada, fadlan taxadar sii arimahani soo socda:

- Hubso in dhamaan dhacdooyiinka ku qabsaday ( iyo kuwa qabsaday qoyskaagaba) ay yihiin **kuwa run ah** oo si rasmi ahna u taariikheysan;
- **U xasuusnaaw sheekadaada si fiican.** Waxaa wanaagsan in aad samaysid **diiwaan galin faafaahimada muhimka** ah ee khuseeya **waqtiga, taariikhda iyo goobta** dhacdooyiinka kudhaceen reerkaaga iyo shaqsiyada ama ururada la xiriira marxaladiina walaaca leh, waayo waxaa laga yaabaa in aad ilaawdid faafaahintani xiliga waraysiga.
- **Kula celceli waraysiga** waqti hore qof aad aaminsantahay. Qofka waxa uu ku waydiini karaa su'aal kusaabsan noloshaada wadankaaga hooyo iyo sababihii aad u soo qaxday.
- **Hadii aad ogaatid khaladaad** kamid ah sheekadaada ama aad aaminsantahay in marxaladaha la xiriira, dhacdooyin ama taariikho ay maqan yihiin, fadlan lasocodsii sarkaalka fiisada ( iyo kuwa ku dhamaano qaadahaada) waraysiga hortiisa;
- Hadii aad doonaysid in aad **ku dartid waarbixin** kusaabsan dhacdooyin laxiriira waxii kugu dhacay ama kudhacay qoyskaaga, oo aanan kuxusnayn sheekadaada shaqsiyeed, fadlan kula socodsii qoraal si deg deg ah sarkaalka fiisada iyo dhamaano qaadayaasha.

Xilliga waraysiga:

Xafiiska fiisada Kanada ayaa ku ogaysiini doona taariikhda, waqtiga iyo goobta waraysiga. Ha seegin taariikhda waraysigaaga.

- Waa in aad timaadaa goobta laguu cayimay waqtiga iyo maalinka lagu siiye. Hasoo daahin, isku day in aad timaadid oogu yaraan nus saac kahor waqtiga waraysiga.
- Waxaa ku wareeysan doona sarkaalka fiisada Kanada. Hadii aad codsatay turjumaan, turjumaanka ayaa sidoo kale qolka kula soo galaya.
- Sarkaalka fiisada ayaa kuwaydiin doona waxii kusaabsan **qaabka iyo sababaha keenay andacoodkaaga qaxootinimo iyo xaalada wadankaagi iyo kana ad magan galyada u joogtid**: Sababta aad ooga soo tagtay wadankaagii hooyo, sababta aadan u laaban Karin iyo sababta aadan u joogi Karin halka aad kusugan tahay. Waxaa kale oo dheeri ah, in lagu waraysto waxbarashadaada, xirfadaada shaqo, qoyskaaga noloshiisa, xirfadaada faransiiska iyo ingiriiska , aqoontada Kanada iyo xiisayn aad u haysid in aad halkaasi degtid.

Sida loo dhaqmo xilliga waraysiga.

- Haka baqanin sarkaalka kasocda la'aanta socdaalka ee waraysiga kula yeelan doona. **Marwalba fiiri sarkaal kuwaraysanaya** marka aad hadlaysid . Ha isku dayin in aad hoos fiirisid marka aad hadlaysid ( marka laga reebo marka aad xusuusatid dhacdo dareenkaaga badasha)
- Waa in aad **aamintid sarkaalka fiisada** oo aad kasiisid jawaabo **buuxa oo run ah** su'aashiisa/su'aasheeda. Intaa waxaa sii dheer, jawaabahaagu waa in ay noqdaan kuwa kala baxsan oo kooban.
- Hadii aadan fahmin su'aasha, haka xishoonin in aad waydiisid sarkaalka in uu kuceliyo ama qaabka su'aasha uu kuu badalo.
- Ha buun buuninin sheekadaada. Waa in aad **sheegta runta oo kaliya**, xitaa hadii ay kula noqorto mid fudud. Xusuusnoow, marqaati kac aanan sax ahayn in uu keeno kari in codsiga la diido.
- Ha u qaadanin uu sarkaalka kawarqabo waxyaabaha adiga si cad kuugu muuqda,; waa in aad sheegtaa **wax walbo** oo aad doonaysid uu sarkaalka ogaado. Khaasatan marka ay timaado **waxyaabaha lagu yaqaano dhaqano ama hab nololeed gaar** ah, waa in aad u sheegtaa sarkaalka waxyaabaha khuseeya sheekadaada.
- Hadii aad ay dad kamid ah **qoyskaaga** kugula jiraan codsiga, waxaa xaqiijisaa in aad kahadashid dhamaan khatarta ay la kulmi karaan hadii lagu celiyo wadankooda hooyo. Tan waxaa kamid ah **khatarka qabsan karta carruurtaada.**
- Hadii aad horay u gudbisay **dokumentiya**, wad xusuusini kartaa sarkaalka fiisada in ay dokumentiyadaasi jiraan waadna tilmaami kartaa qaabka u taageerayaan sheekadaada.

- Waa in aad xaqiijisaa in aad u sheegtid sarkaalka fiisada hadey jireen **isbedel xaga reerka ah.** Hadii aad goor dhow guursatay ama aad cunug dhashay, ogaysii sarkaalka fiisada. Hadii aadan sheegin reerkaaga cusub, waxaa laga yaabaa in aanan laguu ogolaan in ay mar dambe kuu yimaadaan.
- Hadii aad damaqsantahay ama aad caraysantahay oo aad mudo yar rabtid in aad banaanka u baxdid si aad arimahaaga isugu duwatid, haka xishoonin ama haka cabsanin in aad sarkaalka fiisada aad fasax waydiisatid.
- **Haka tagin qolka waraysiga aad oonan sheegin wax walbo** oo aad doonaysay in aad u sheegtid sarkaalka. Hadii aadan si buuxda usheegin dhamaan khatarta aad kala kulmaysid ama aad kala kulmi kartid hadii aad u laabatid dalkaaga, waxaa laga yaabaa in uu sarkaalka fiisada uusan khatarahaasi uusan tix galin marka uu gaarayo go'aanka.

<u>Iashaqaynta turjumaanka:</u>

Hadii aadan kuhadlin Faransiis ama Ingiriis, turjumaano ayaa ku caawini kara xilliga waraysiga. **Hadii ay noqoto in aad isticmaashid caawimaada turjumaan xilliga waraysiga:**

- Hubso in aad fahmi kartid turjumaan si wanaagsan oo adigana sidoo kale uu kuu fahmi karo.
- Ooga jawaab su'aalaha si kala baxsan, **suaal walbana u qaybi jawaabo gaagaaban** si uu turjumaanku u turjumo erey walba oo aad dhahdid. Xusuusnoow turjumaanada looma ogoli in ay hadalkaaga soo koobaan ama ay qayb kamid ah hadalka katagaan.
- Haka baqanin in aad sida runta ahi uhadashid marka aad horjoogtid turjumaanka adiga oonan eegeyn asalkooda diineed, dhaqameed amaba qoomiyadeed. Kaalinta turjumaanka ayaa ah in uu kaa cawiyo adiga iyo sarkaalka fiisada in aad isfahantaan. Turjumaanka ma duufsani karo go'aanka sarkaalka fiisada.
- Hadii aad u malaysid in uu turjumaanku sameeye khalad ama uu warbixinta qaarkeeda meesha kasaaray, waa in aad **u sheegtaa sarkaalka fiisada si deg deg ah.** Haka cabsanin in aad turjumaanka kadhex gashid hadalka, hadii aad doonaysid in aad saxdid khallad uu sameeye turjumaanka.
- Hadii aad hubtid in turjumaanka lagu siiye **uusan shaqo fiican qabanaynin**, fadlan **la socodsii sarkaalka fiisada si deg deg ah.**Tusaale ahaan, hadii uu turjumaanka oogu hadlin kuuqadaada sidaada oo kale oo isfahan la'aan arinkaasi sababayso, si asluub leh u waydiiso in lagu siiyo turjumaan kale si deg deg ah. **Ha sugin ilaa waraysiga uu ka dhamaado** in aad sheegtid tuhunkaaga ah in uu turjumaanka khaladaad.
- **Hadii uu sarkaalka ama turjumaan** si khalad ah uu kaa gudbiyo hadal aadan oran ama ay si khalad ah u fahmaan waxii aad tiri, haka xishoonin ama haka baqanin in aad iyaga saxdid.
- Hadii aad tahay haweeneey turjumaankana yahay nin ( Dhanka kalena waa lamid) oo ay aadan kufaraxsanayn in aad sheekadaada shaqsiyeed ku hor sheegtid, haka xishoonin ama haka baqanin in aad arinkaas u sheegtid sarkaalka.

Waxyaabaha la doonayo in aad la timaadid xilliga waraysiga:

Fadlan keen dhamaan **asalka** dokumentiyada rasmiga ah ee aad haysid sida, sida:

- Dokumentiyada aqoonsigaaga iyo dhamaan kuwa reerkaaga ee kujira codsiga;
- Dokumentiyada taageeri kara sheekadaada shaqsiyeed iyo cabsiga aad ka qabtid in dhulkaaga hooyo lagugu jirdalayo.
- Hadii aad keentid waraysiga dokumentiyo aad horay u soo gudbinin sarkaalka, waa in aad u sharaxdaa sarkaalka fiisada sababta aad waraysiga hortiisa usoo gudbin wayde.

- Hadii uu dokumentiyada mid kamid ah ku qornayn Ingiriis ama Faransiis, fadlan keen koobi dokumentiga ah oo turjuman.
- Hadii aadan hayn dokumentiyada loo baahan yahay, fadlan diyaar u noqo in aad u sharaxdid sarkaalka sababta aadan u hayn dokumentiyadaasi.

Waraysiga waxii kadambeeya:

Sida caadada ah, sarkaalka fiisada ayaa go'aan gaaraya oo kuu sheegaya go'aankaasi marka uu waraysiga dhamaado. Hadii codsigaaga la ansixiyo, waxaa lagu siinayaa foomamka caafimaadka waraysiga dhamaadkiisa. Balse, waxaa dhacdo mararka qaar, in uu sarkaalka fiisada u baahdo waqti badan si uu go'aan u gaaro.

Hadii aanan lagu siinin foomamka caafimaadka waraysiga marka uu dhamaado:

- Waxaa haboon in aad diyaarisid warbixin kooban oo kusaabsan waraysiga laga soo bilaabo xilligii aad soo gashay dhismaha. Fadlan waxaad qortaa dhamaan su'aalahii lagu weeydiiye iyo jawaabihii aad kabixisay.
- Hadii aad u malaysid in uu wax isdaba maray mudada waraysiga, tusaale ahaan hadii aad ilaawday in aad sheegtid dhacdooyin muhim ah, fadlan si deg deg ah qoraal ugula socodsii sarkaalka fiisada iyo dhamaano qaadayaashaadaba.
- Hadii waraysiga gadaashiisa aad heshid **dokumentiya cusub**, fadlan si deg deg ah oogu gudbi xafiiska fiisada ( iyo dhaama qaadahaaga).